

**Gunaanadka Macnaha Guud ee Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda  
Fred Hutchinson Cancer Center**

Nugullada turjuman ee gunaanadkaan, foomka codsiga, iyo siyaasada kaalmada maaliyadeed halkan ayaa laga heli karaa [fredhutch.org/financial-assistance](https://fredhutch.org/financial-assistance) :

- 财务援助政策简明概要, Simplified Chinese
- 재정 지원 정책 쉬운 요약, Korean
- Краткое изложение политики финансовой помощи доступным языком, Russian
- Resumen en lenguaje sencillo de la política de asistencia económica, Spanish
- Bản Tóm Tắt Bằng Ngôn Ngữ Đơn Giản Về Chính Sách Hỗ Trợ Tài Chính, Vietnamese
- Buod sa Simpleng Wika ng Patakan sa Tulong Pinansyal, Tagalog
- የደቡብ አማርኛ ገጽ ለ ገጽ ፋይናንሻል ማህተም , Tigrinya
- សេចក្តីសង្ខេបដោយប្រើភាសាសាមញ្ញអំពីគោលការណ៍ស្តីពីជំនួយហិរញ្ញវត្ថុ , Khmer

Fred Hutchinson Cancer Center waxaa ka go'an in ay hubiso in bukaanadeenu ay helaan daryeelka isbitaalka ay u baahan yihiin iyadoo oo aan loo eegin awooda ay u leeyihiin in ay iska bixiyaan kharashka daryeelkaas. Siinta daryeelka caafimaad kuwa aan awoodin in ay iska bixiyaan lacagta waa qayb ka mid ah himiladeena wuxuuna sharciga gobolku ku waajibinayaa isbitaalada in ay siiyaan daryeel bilaash ah iyo qiimo dhimis bukaanada xaqa u leh. Waxaa laga yaabaa in aad u qalanto daryeel bilaash ah ama qiimo dhimis leh iyada oo aay ku salaysantahay tirada qoyska iyo dakhliga, xitaa haddii aad leedahay caymis caafimaad.

Haddii aad u malaynayso in ay dhibaato kaa haysato bixinta kharashka daryeelka caafimaadkaaga, fadlan anaga nala hadal. Marka ay suurtoagal tahay, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa in aad codsato gargaar dhaqaale ka hor inta aanad helin daawaynta.

**Maxaa Laga Daboolayaa?** Adeegyada ku habboon isbitaalka Fred Hutchinson Cancer Center waxaan siinayna daryeel lacag la'aan ah iyo kaalmo maaliyadeed/daryeel samafal bukaanada xaqa u leh oo ku salaysan cabbirka kharashka, oo leh qiimo dhimis u dhaxaysa 50% ilaa 100%. Ma jiro bukaan u qalma kaalmada dhaqaale/daryeelka samafalka laguma dalaci doono wax ka badan inta guud ahaan lagu dallaco bukaanada caymiska leh.

**Sida Loo Codsado:** Bukaan kasta ayaa codsan kara inuu helo kaalmo dhaqaale/daryeel samafal iyagoo soo gudbinaya codsi, keenayana dukumiintiyada looga baahanyahay. Haddii aad qabto su'aalo, aad u baahan tahay caawimo, ama aad rabto in aad hesho foom codsi ama macluumaad dheeraad ah, fadlan nala soo xidhiidh:

- Marka aad tagayso ama aad ka so baxeyso isbitaalka ama rugaha caafimaadka;
- Hab Telefoon ah : (206) 606-6226 ama wicitaanka bilaashka ah 1 (800) 304-1763
- Websaytkeenna: [fredhutch.org/financial-assistance](https://fredhutch.org/financial-assistance)
- Shakhsi ahaan: booqo waaxyadeena La-talinta Dhaqaalaha ee Fred Hutchinson Cancer Center's Lake Union Clinic oo ku taala 825 Eastlake Ave. East, Seattle, Washington, 98109
- Si aad u hesho dukumentiyada adigoo u maraayo boostada lacag la'aanta ah: iimayl [finccounsel@fredhutch.org](mailto:finccounsel@fredhutch.org) ama wac (206) 606-6226

**Kaalmooyinka kale:**

**Caawinta caymiska:** Waxaa laga yaabaa in aad u qalanto barnaamijyada kale ee dawladda iyo bulshada. Waxaan kaa caawin karnaa in aad barato in barnaamijyadan (ay ku jiraan faaidooyinka Medicaid/Apple Health and Veterans Affairs) ay kaa caawin karaan bixinta biilashaada caafimaadka. Waxaan kaa caawin karnaa in aad codsato barnaamijyadan.

**Qiimo dhimis aan caymis lahayn:** Waxaanu siinaa qiimo dhimis bukaanada aan haysan caymis caafimaad. Fadlan nagala soo xiriir waxyaabaha ku saabsan barnaamijkeena qiimo dhimista.

**Qorshayaasha lacag-bixinta:** Haraa kasta oo qaddarka lagugu leeyahay wuxuu ku dhammaanayaa 30 maalmood gudahood. Haraaga waxaa lagu bixin karaa mid ka mid ah siyaabaha soo socda: kaarka deynta, qorshaha lacag bixinta,

lacag caddaan ah, jeeg, ama bixinta biilka onleenka ah. Haddii aad u baahan tahay qorshe lacag-bixineed, fadlan wac lambarka ku qoran bayaanka biilashaada.

Waad ku mahadsan tahay sida aad noogu aamintaydaryeelkaaga.